


Maxay tahay sababta carruurta reer TN aysan u haysan caymis caafimaad iyo sida wax looga qaban karo

Medicaid, oo sidoo kale loo yaqaano TennCare, ayaa ah halka helaan carruur TN oo gaaraya 830,000 ay caymis caafimaad ka helaan. Gobol kasta wuxuu helaa deeq federaal ah oo isu dhigma oo waxayna leeyihiin debecsanaan ay ku qaabaystaan barnaamijka sida waafaqsan tilmaamaha federaalka. Carruurta, caymiska Medicaid wuxuu u fidiyaa caymis la isku hubo, adeegyada takhaatiirta carruurta ay ku taliyaan, iyo ilaalinta qarash la wadaago.

Barnaamijka Caymiska Caafimaadka Carruurta, oo sidoo kale loo yaqaano CoverKids ee Gobolka Tennessee, wuxuu qaabeeyaa aassaaska Medicaid si loo caymiyo carruur gaaraya qiyaastii 34,000 oo ay dhaleen qoysas shaqeeya ee aan u qalmin caymiska Medicaid oo aanna heli karin caymis caafimaad la goyn karo oo gaar loo leeyahay

- Ku dhowaad **56,000 (5%)** oo ah carruurta ku nool Tennessee caymis ma leh, laakiin waxay xaq u leeyihiin Medicaid (TennCare) ama CHIP (CoverKids).
- Degmooyinka ay ku nool yihiin tirada ugu badan ee carruurta caymiska aan haysan laga bilaabo sanadka 2019
 1. Degmada Shelby - 13,777 (5.6%)
 2. Degmada Davidson - 10,407 (6.8%)
 3. Degmada Rutherford - 4,229 (5.1%)



Halka laga soo xigtay: Xafiiska Tirakoobka Mareykanka, 2015-2019 Qiyaasaha Sahaminta Jaaliyadda Mareykanka 5-Sano

Carruurta aan Caymiska Haysan ee Heerka Saboolnimada

Heerka Saboolnimada	Tirada
Ka hooseeya	23,000
100%-149%	11,000
150%-199%	11,000
200%-299%	16,000
300% ama ka	16,000

Qoysaska qaar xadka daqligood sareeya si ugu qalmaan barnaamijka TennCare ama CoverKids. Laakiin, qoysas badan ayaan ogeyn in weli ay u qalmaan qaybo qaar ee barnaamijkan.

Waxaad ka qaban kartaa?

- Warka sii faafi in ku dhowaad canug kasta oo aan haysan caymis caafimaad uu u qalmo nooc caymis caafimaad ah.
- Taageer barnaamijyada aasaasiga u ah caymiska caafimaadka ee carruurta reer Tennessee.
- Musharaxiinta doorashooyinka ku jira iyo saraakiisha la soo doortay weydiya su'aallaha sida "Maxay yihiin qorshahaaga ku aadan in canug kasta ee reer Tennessee ah inuu helo daryeel caymis caafimaad?"